



## Qorsheynta Dugsiga Sare ee Lincoln ee cusub ayaa hadda socota

Tallaabooyinka ugu horreeya ee dib u dhiska Dugsiga Sare ee Lincoln ayaa ka socda iyada oo degmadu samaysay Kooxda Tala bixinta Naqshada (DAG) oo bulshadu horseed ka tahay. Waxaa mahada leh xeerkii maalgelinta daymeed ee Maajo 2017-ka, PPS waxay hore u sii wadaa qorshaynta, naqshadeynta iyo dhismaha Dugsiga Sare ee Lincoln ee cusub. Qorshaha weyni ee Lincoln wuxuu ku baaqayaa in dugsiga dhib loo dhiso isaga oo ah dhisme dabaqyo badan ka kooban kaasi oo laga dhisayo dhanka bidix ee dhismaha hada jira.

PPS waxay raadinaysaa talooyinka dadweynaha oo ku saabsan sida ay tahay in Lincoln cusub loo naqshadeeyo isla markaana waxay raadinaysaa tabarucayaal ku soo biira Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Lincoln (DAG). Ujeedada DAG waa horumarinta qorshe dhammaystiran, sinnaansha leh, isku-dhafaan isla markaana leh aragti leh oo la kaashanayo ka qayb qaadashada bulshada dugsiga ee dhabta ah.

### **Ku soo biir Lincoln DAG**

Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Lincoln (DAG) waxaa ka mid noqon doona ugu yaraan hal xubin oo oo matalaya mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda: waalidiinta dugsiga sare, waalidiinta xaafada, waalidiinta dugsiga laga imaanayo, dugsururada xaafada, ururada ganacsiga, barnaamijyada dugsiga, goobta suurtagalka ah iyo/ama hawl wadaagayaasha lacageed, ardayda, iyo macallimiinta iyo wakiilka guddiga dugsiga. Ku soo biir Kooxda Tala bixinta Naqshada ee Lincoln, isticmaal [codsiga internet-ka](#). Haddii aadan awoodin in aad ku biirto DAG, waxaad weli fursad u heli doontaa in codkaaga lagu dhageysto Kulanka Nashqadeynta Dadweynaha ee Lincoln ee soo socda. Wixii macluumaad dheeraad ah iyo macluumaadkii u dambeeyay booqo [website-ka mashruuca](#).

### **DAGS kale ee shaqada ka haya Kellogg, Madison**

Tiro badan oo la taaban karo oo ah shaqo wax lagu nashqadeynayo ayaa ka socota guud ahaan degmada. Kooxda Tala bixinta Naqshada oo loogu talagalay Dugsiga Sare ee Madison iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg ee dhawaan la dhisayo labadoodaba ayaa sidoo kale hada socota. Madison waxay kulankeedii koowaad yeeshen Diisambar 11 iyaga oo sii wadi doona in ay si joogta ah u kulmaan guud ahaan Maajo 2018-ka. Kellogg DAG waxay yeelatay shan kulan tan iyo Oktoobar, iyada oo qorshahaheeda weyna ay Guddigu ku oggolaatay kulankeedii dhacay Diisambar 21. Madison iyo Kellogg labadoodaba waxaa la qorsheeyay in dhismuhu bilaabmo xagaaga 2019-ka.

### **Faahfaahinta Mashruuca Lincoln**

Inta lagu jiro nidaamka dhismaha ardaydu waxay sii joogi doonaan dhismaha hada ay ku jiraan inta uu dhismaha Lincoln cusub uu ka socdo garoomada ciyaaraha ee ku yaala geesta galbeed ee dhismaha. Marka shaqada la dhammeystiro, ardaydu waxay u guuri doonaan dhismaha cusub iyada oo dhismihii asalka ahaa ee Lincoln la dumin doono isla markaana lagu bedeli doono garoono ciyaaro oo cusub. Dhismaha waxaa la qorsheeyay in uu bilaabmo 2020.

*-David Mayne*